

Mitthem

EUROPEISKA UNIONEN
Europeiska regionala utvecklingsfonden

# Hållbara tillsammans

## Deggaan dhab ah

## Deggaan waara oo dhab ahaan loo helo

Guriga aad kireysatay wuxuu ka mid yahay guryaha dadweynaha, waxaana iska leh dhamaan muwaadiniinta degmada Sundsvall. In aad Kireysato guri macnaheedu waxaa weeyaan in aad xaq u leedahay in aad isticmaasho guriga, laakiin sidoo kale waxaa kaa saran mas'uuliyad in aad ilaaliso guriga. Sidaa darteed, waxaa muhiim ah in aad ka taxadarto gurigaaga si aad uga fogaato waxyeello kharash wadata oo kugu timaada.



Guryuhu way duugoobaan caadi ahaan maxaa yeelay waa la deggan yahay, laakiin duugowga aan caadiga ahayn qofka guriga kireystay ayaa iska bixinaya shakhsi ahaan marka uu ka guurayo. Sidaa darteed ayaa loo sameeyaa kontoroolida markii aad adigu soo degaysid iyo markii aad adigu ka guuraysid.

Haddii adigu aad qabtid wax su'aalo ah, fadlan la soo xiriir qeybta wargelinta dhibaatooyinka.

### Tusaale ahaan waxyaabaha adiga waajibka kugu noqon kara in aad soo magdhawdo

- Haddii gurigu u baahan yahay in la nadiifiyo sababtuna ay tahay in sigaar lagu cabbay guriga gudihiisa.
- Waxyeello biyo keeneen oo aad adigu sababtay
- Qataarka oo la beddelo haddii aad adigu lumiso furaha
- Waxyeello ku timaada albaabada iyo daaqadaha

Heshiiska kirada guriga iyo sharciga waxaa ku qoran in kireystahu uu mas'uul ka yahay daryeelka guriga iyo wixii gurigu leeyahay.

### Tusaale waxyaabaha adiga oo ah kireystaha guriga laga sugayo in aad shakhsi ahaan samayso

- Tallaabooyinka/waxyaabaha sahlan guriga dhexdiisa, sida adkaynta bool dabcay ama wax la mid ah
- Beddelida guluubyada/nalalka
- Laydhi oo ka xaaq barafka balakoonka, daarada, baarkinka ama irid adiga kuu gooni ah haday jirto.
- Beddel fiyuusyada

# jiko



## Ay tahay in la sameeyo

- Ka qaad barafka qaboojiyaha hal mar sanadkiiba
- Nadiifi shaandhada qiiqa ee jikada marmar
- Nadiifi jikada si aad uga taxadarto cayayaanka waxyeellada keena.
- Ku dhaq weelka saabuunta lagu calaamadeeyey in aysan bey'ada wax yeelayn
- Kaga tirtir dufanka distiyaha waraaqaha guriga ka hor inta aan la dhaqin

## Ma aha in la sameeyo

- Ha ku shubin dufanka tuubada wasakhda qaada
- Ha raacin hambada cuntada ka soo harta tuubada wasakhda qaada
- Ha dhaqin weelka biyaha oo socda
- Ha ku ururin qashinka guriga gudihiisa
- Ha ka tegin albaabka foornada oo furan marka ay foornadu shidantahay
- Ha raacin qashinka kaffeega tuubada wasakhda qaada

## Ku tuur dufan/saliid

Dufanku wuu adkaanayaa marka ay qabow tahay. Taasi waxay ka dhigan tahay haddii aad adigu ku shubayso dufanka godka biyaha wasakhda maraan waxa ay noqoneysaa in ay adkaato oo ay ku dhagto tuubada. Waxaa laga yaabaa in ay sameyso guntimo/kuuskuus oo ugu danbeyntana ay keento daad/fatahaad.



**Sidan samee:**
Waxaad ku xirtaa shoolada shaliida dhalo caadi ah kuna shub dufankii qaboobaa ee ka yimid cuto karinta. Marka dhaladu ay buuxsanto waxaad adigu ka furaysaa shooladii saliidda, ku xir daboolka dhalada oo dhaladana ku tuur meesha qashinka guban kara ee guriga.

## Nadiifi marawaxada qiiqa ee jikada

Marawaxada qiiqa ee jikadu waa qeyb ka mid ah nidaamka hawada ee guriga. dufanka iyo boodhka labaduba waxay ku dhagayaan shaandhada/filtarka, ka dibna hawo-qaadashadu si fiican uma shaqeynayso. Shaandho/filtar wasakhaysan oo ku jira marawaxada qiiqa ee jikada waxay noqon kartaa khatar dab.



**Sidan samee:**
Ka saar dabolka adigoo qabanaya labada bottoon kadibna hoos u soo dajinaya daboolka.



Ka saar shaashadda/filtarka adigoo hoos u qabanaya labada caaradood. Ku dhaq shaandhada/filtarka saabuun iyo biyo diirran.

Ku celi shaandhada/filtarka iyo xajiyaha meeshoodii. Kadibna ku celi daboolkii, adigoo qeybta danbe ka bilaabaya marka hore. Kadibna ku riix adigoo ku xiraya qeybta hore.

## Ka qaad barafka qaboojiyaha

Marka qaboojiyaha uu ka buuxsamo baraf, wuxuu isticmaalayaa koronto badan. Sidaa dareed, waxaa fiican in laga qaado barafka qaboojiyaha, ugu yaraan hal mar sanadkii. Ka sakow in ay ka sii raqiisoobayso marka ay isticmaasho koronto yar, cunto haynteeduna way ka sii fiicnaanaysaa. Waxay noqon kartaa fikrad fiican in laga qaado barafka qaboojiyha xilliga jiilaalka/qaboobaha, marka cuntooyinka barafaysan lagu dabiibi karo dibedda marka hore. kadibna raashinka la qaboojiyay ayaa waxay noqon karaan kuwo ku sii qaboobaada banaanka inta lagu jiro mudadaas.





Fiiri qaboojiyaha marmarka qaarkood si biyaha  ka soo baxaa aysan u gaadhin dhulka.

**Sidan samee:**
Ka soo saar cuntada qaboojiyaha. Demi qaboojiyaha kadibna balaq albaabka qaboojiyaha. Ku daa sanduuqa ugu hooseeya haku sii jiree si biyaha dhalaalaa ugu ururaan. Dhig shukumaan dhulka hortiisa ah. U kaadi barafku ha dhalaalo kadibna hasoo dhaco kaligii. Ha isku dayin in aad ku burburiso shay af-fiiqan, markaa waxaa dhaci kara in qaboojiyuhu halaabo.

Xaqiiji in qaboojiyuhu gebi ahaanba qalalan yahay ka hor inta adigu aadan dib u daarin.

Ku soo celi alaabooyinka cuntada marka ay gaadhao heerkulka saxda ah.

# musqusha

## Ay tahay in la sameeyo:

- Xir tuubada inta aad adigu cadayanayso
- Qaado qubaysi gaaban halkii aad ku maydhan lahayd barkada ama ka qaadan lahayd qubeysi wakhti dheer
- Isticmaal daaha qubayska si aad biyaha ugu hayso meesha qubeyska
- Ku hayso weelka qashinka gudaha musqusha si aan qashin loogu tuurin tuubada biyaha wasakhda maraan.

## Ma aha in la sameeyo:

- Adigu kuma xiri kartid tuubo qabays
- Ha ka daloolin god derbiga musqusha, waxay sababi kartaa waxyeelo qoyaan.
- Biyo ha ku buufin dhammaan musqusha si aad ugu nadiifiso
- Ha biyo raacinin wax aan ahayn kaadi, xaar iyo warqada musqusha

## Daboolka biyaha iyo godka dhulka

Haddii biyuhu si tartiib ah uga soo baxaan hoosta saxanka waji-dhaqashada ama musqusha, had iyo jeer waxaaff sabab u ah timaha, haraaga saabuunta iyo wasakhd ku dhagtay oo samaysay guntin/kuus. Taasi waxay xanibaysaa in ay biyuhu baxaan.





**Sidan samee badelkii dhaqista:**
Ku dabool duleelka daadinaya suulka ama sharooto. Ku riix nadiifiyaha duleelka biyihu maraan. Ka buuxi saxanka waji-dhaqa kala barkiisa biyo kadibna kor iyo hoos ugu riix nadiifiyaha. Haddii nadiifiyahu uusan ku caawinin ama adigu aadan haysan nadiifiye, isku day in aad nadiifiso daboolka biyo-mareenka.

Dhig baaldi saxanka waji-dhaqa hoostiisa si aad uga hortagto in biyaha wasakhda ahi ay dhulka gaaraan. Ku fur qeybta hoose ee biyo-mareenka gacanta. Ha adeegsan wax qalab ah, markaas way jabaysaa.

Ugu xir ka dibna si taxadar leh qeybtii hoose. Una feejignaw in aad hubsato in daboolka ningaxu uu meeshiisii ku jiro kadibna hubi in ay gufeysantahay. Haddii biyuhu wali aysan soconin, la xiriir qeybta wargelinta ciladaha.



**Sidan samee meesha qubeyska:**
Kor u qaad shaandhada, halkaa waxaa ku jira dabool-biyo. Toosana u soo bixi oo ka nadiifi dhammaan timaha iyo waxyaabaha kale ee gudaha ku dhegay. Ka dibna dib ugu celi daboolka biyaha oo si adag u adkee.

Haddii adigu aad leedahay nooc kale oo ah godka dhulka, waxaa laga yaabaa in aysan suurtagal ahayn in aad u nadiifiso qaabkan oo kale. Lasoo xiriir adigu qeybta wargelinta ciladaha wixii macluumaad dheeraad ah.

### Waxaad biyo raacisaa oo kaliya kaadi, xaar iyo waraaqda musqusha

Wixii kale oo dhan waa qashinka guriga waana in lagu tuuraa meesha qashinka. Qashinka la raaciyo biyaha kuma aha oo kaliya dhibaato nadiifinta biyaha wasakhda, waxay sidoo kale keeni kartaa fatahaad biyo ku timaada adiga naftaada iyo deriskaaga haddii qashinku ku dhego tuubooyinka.

## Ka taxadar waxyeellada biyaha



Musqushu waa meesha caadi ahaan ay ku timaaado waxyeellada qoyaanka iyo caaraysiga. Caaraysigu wuxuu halis ku yahay caafimaadka in la dayactiro waxyeellada qoyaanka kharashkeedu aad ayuu u badanyahay. Sidaa darteed, waxaa muhiim ah in aan isku dayno in aan ka taxadarno waxyeellada qoyaanka iyo biyaha.

Sababta caadi ahaan keenta waxyeellada biyaha waxaa weeyaan nadiifin aan sax ahayn oo musqusha lagu sameeyo.

- Ha ku samayn derbiga duleel, waxay kharibaysaa awooda ishaysashada waxayna ku sii daynaysaa qoyaan derbiga halkaasna waxaa ka samaysmi karta caaraysi.
- Ha ku rushayn biyo derbiyada mushqusha oo dhan adiga oo isticmaalaya tuubada qubeyska
- Isticmaal badalkeeda isbuunyada dhulka iyo istaraasho
- Markay ay biyuhu ka soo gaaraan dhulka banaanka qubeyska, isticmaal dhul-tirtiraha af-ka dhuuban si aad biyaha u aadisid godka biyaha ama ku qalaji tuwaal.

### Keydi biyaha

Guryo badan oo Mitthem leedahay, kiraystayaahu waxay helaan qaansheegashada biyaha ay iyagu isticmaaleen. Iyada oo la adeegsanayo yareynta isticmaalka biyaha wuxuu qofku badbaadin kartaa labadaba tamar iyo lacag.

- Qaado wakhti gaaban oo qubeys ah halkii aad barkada ku dabaalan lahayd
- Xir biyaha inta aad adigu cadayanaysid ilkaha
- Ku dhaq weelka oo ku maydh dharka mishiinada oo buuxa
- Isticmaal weel godan hadii adigu weelka aad gacmaha ku dhaqaysid
- Soo wargeli tuubooyinka iyo kursiga fadhiga musqusha hadii ay daadinayaan biyaha qeybta wargelinta ciladaha.

## Xir biyaha

Haddii adiga gurigaagaay ku timaado daadis biyo oo aad u baahan tahay in aad xirto biyaha waxaad adiga haysataa fursad aad ku sameyn karto midaas waxaadna ka xireysaa dhinaca musqusha.

**Sidan samee:**
Kiraystayaasha haysta kursiga musqusha ee derbiga ku dhegan waxaa jira khaanad ku dheggan derbiga musqusha korkiisa. Waxaana isku haya magneet/bir-qabato. Xagga guddaha ee khaanada waxaa ku yaala meel guduud iyo buluug ah halkaas oo aad adigu ka xiri karto biyaha. Kadib wac qeybta wargelinta ciladaha.

Haddii adigu aad leedahay musqusha dhulka ku dheggan, adiga kaligaa kama xiri kartid biyaha guriga. Kadib waxaad si degdeg ah u wacaysaa qeybta wargelinta ciladaha haddii adiga gurigaagu leedahay biyo daadin.





## Rakibaada biyaha

Kireyste ahaan qofku ma samayn karo rakibaada qalabka biyaha, sida tusaale ahaan ku rakibida tuubo qubeys oo lagu rakibo tuubada saxanka waji-dhaqista. Si khaldan oo loo rakibo tuubada qubeyska ee gacanta ayaa ah sababta ugu weyn ee sababi karta waxyeellada biyaha. Haddii adigu aad qabtid wax su’aalo ah, fadlan la xidhiidh qeybta wargelinta ciladaha.

# Koronto iyo kuleyliye

## Ay tahay in la sameeyo

- Dami nalalka marka adigu aad ka baxaysid qolka
- Ka qaad barafka qaboojiyaha hal mar sannadkii si loo yareeyo isticmaalka korontada
- U oggolow in kuleyliyihu uu ka xoroobo alaabta guriga oo hortiisa lagu xanibo, markaas kuleylku si uu u faafo.
- Si degdeg ah u laydhi halkii aad ka tagi lahayd daaqadaha furan

## Ma aha in la sameeyo


- Haddii hal shay uusan laheyn ilkaha korantada darbiga lagaliyo, adiga naftaadu kuma rakibi kartid
- Ma soo xiriirsan kartid koronto aad leedahay, sida tusaale ahaan qaybisooyin badan
- Adigu ma sameyn kartid fiyuusyada xumaaday. La iskuma halayn karo
- Fiilooyinka korontada waa weyn waa in aan la isticmaalin si koronto looga keeno banaanka ama balakoonka
- Ha ku xirin fiilooyinka korontada albaabbada ama daaqadaha

## Beddel fiyuuska

Khaanada fiyuusyada waxaa ku jira fiyuusyo ka ilaaliya korontada xad-dhaafka ah. Haddii aad leedahay qalab koronto oo aad u badan oo isku wakhtina daaran, hal ama fiyuusyo badan ayaa bixi kara kadibna korontada ayaa go,aysa.





**Sidan samee:**
Waxaad raadisaa midabka yar oo dhamaadka fiyuuska ku yaala. Haddii dhibcda midabku ay soo fuqday markaas fiyuusku wuu xumaaday. Ku beddel fiyuuska xumaaday mid cusub oo uu midabkiisu yahay midab la mid ah midka ku yaala sagxada hoose ee fiyuus-xajiyaha. Waligaa ha isku dayin in aad hagaajiso fiyuus xumaaday - wuxuu bilaabi karaa in uu gubto!

Guryaha qaarkood waxa ay leeyihiin fiyuusyo otomaatig ah. Markaad heshay oo aad tallaabana ka qaaday wixii keentay sababta korantada xad-dhaafka ah, dib ugu celi fiyuuska adiga oo riixaya bottonka fiyuuska soo dhacay.

### Haddii aysan lahayn ilkaha darbiga gala

Kirayste ahaan, waxa aad isku xiri kartaa oo kaliya waxyaabaha leh ilkaha lagu xiri karo. Noocyada kale ee isku xir koronto ah waxaa kaliya oo sameyn kara kuwa koronto yaqaanka ah. Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan xiriirinta korantada, la xiriir qeybta wargelinta ciladaha.

## Damiyaha shooga korontada

Guryo badan waxaa ku yaala damiha shooga korontada. Iyadu waxay ogaaneysaa haddii ay wax ka qaldan yihiin nidaamka korontada ka dibna waxay jaraysaa korontada si ay u badbaadiso gurigaaga.




**Sidan samee:**
Dib u rog furaha damiyaha shooga korontada. Haddii uu dib u furto, ka bixi korontada wixii ugu dambeeyey ee aad ku xirtay korontada haddii aad garanaysid midkuu ahaa kadibna dib u daar damiyaha shooga korontada mar kale. Haddii aadan garanayn wixii ugu dambeeyey ee aad galisay korontada, ka soo bixi / dami dhamaan fiyuusyada kadibna daar damiyaha shooga korontada mar labaad. Ku xir / kor u riix fuusyadii midkiiba hal mar inta uu damiyaha shooga korontadu dib u daarmayo. Qalabkii korontada khaldan wuxuu ku xiriirsan yahay fiyuuskaas. Ku samee sidaas si lamid ah dhamaan wixii qalab xiriir la leh fiyuuskaas. Marka uu is xiro damiyaha shooga korontadu, waxa aad adigu garanaysaa qalabka sababay arintaas. Haddii ay dhacdo in damiyaha shooga korontadu uu is xiro xitaa haddii adiga aysan jirin in aad fiyuusyo ka bixisay/galisay, la xiriir qeybta wargelinta ciladaha.

## Maxaa keena in uu is xiro damiyaha shooga korontada?

Sababta ugu caansan ee uu isku xiro damiyaha shooga korantada ayaa ah in qalab koronto uu soo gaaro qoyaan. Sidaa darteed, waa wax caadi ah in mid ka mid ah qalabkan uu sababta leeyahay.


- Biyo kariye/kuleyliye
- Kaffee sameeye
- Feero/kaawiyad
- Jaajarka mobaylka
- Qalabyada ku xiriirsan korontada balakoonka

## Kulayl

Guryaha Mitthem waa in uu heerkulku ahaadaa ugu yaraan 20 °C qolka dhexdiisa.

Marka heerkulbeegga ku yaalla kuleyliyaha uu oggaado in ay tahay 21 ° C qolka dhexdiisa, wuxuu jarayaa socodka biyaha dhexmarayey kuleyliyaha.

Kulayliyuhu wuu qaboobayaa si ku meel gaar ah taasina waa sababta ay marmarka qaarkood looga dareemo kuleyliyaha qabow inkastoo heerkulku eber ka hooseeyo banaanka.



**Haddii adigu aad u maleyneyso in ay aad u qabow dahay, sidan samee:**

- Kuleylku ma gaari karo qolka haddii aad dhigto alaab waaweyn ama aad daahyo dhaadheer ku xanibto kulayliyaha hortiisa.
- Waxaa loo baahan yahay ugu yaraan 40 cm oo meel banaan ah wajahada kulayliyaha si ay u shaqayso si sax ah.
- Soo sheeg haddii ningaxa ku wareegsan daaqadaha iyo albaabbada balakoonka ay halaysan yihiin ama maqan yihiin – halkaas haddii kale kuleylka ayaa ka baxaya. Fiiri ningaxyadaada kadibna laxiriir qeybta wargelinta ciladaha haddii ningaxyadaas ay halaysan yihiin ama maqan yihiin. Ha xirin hawo qeybiyaha gurigaaga. Guri kiro waxaa loo dhisaa in uu leeyahay qaab hawo oo shaqaynaya. Haddii fantaleeshinyada la xiro ama ay daboolmaan, waxaa istaagaya hawo qeybintii in ay u shaqayso si waxtar leh.

### Kuleyliye qabow

lama hubo in dhammaan kuleyliyaashu ay kulul yihiin. Mararka qaarkood loo baahana wax hal kuleyliye ka badan si heerkulka qolku uu u noqdo 20 °C. Sidaa darteed, waxaa muhiim ah in aad adigu hubiso waxa aad adigu ku haysato heerkulka qolka dhexdiisa.

Mar walba ma aha in uu kuleyliyuhu wada kulul yahay. Miyuu kuleylkiisu yahay dhinaca kore, wax kasta waa sidii loogu talagalay. Dhinaca kale hadii kuleykiisu yahay dhinaca hoose ama haddii uu shanqarayo, miyaa la maqlayaa sidii in ay wax qulqulayaan gudaha kuleyliyaha? Markaas wuxuu u baahan karaa kuleyliyuhu in hawada laga saaro. La xiriir qeybta wargelinta ciladaha.

# qashin

## Ay tahay in la sameeyo

- Ha gadanin waxyaabo adigu aadan u baahnayn. Wax kastoo ugu dambeyntii waxay noqonayaan qashin.
- U samee sanduuq/weel cuntada haraaga ah.
- Ha gadanin badeecooyinka wata kartoomo aan loo baahnayn.
- Iibso/gado wax la soo isticmaalay, halkii aad wax cusub ka gadan lahayd. Waxay yareysaa tirada qashinka.

## Ma aha in la sameeyo

- In aad ku tuurto qashinka dhulka
- In aad u soo qaadato guriga waxyaabo ay dad kale iska soo tuureen.
- In aad dhigto qashinka meelaha dadka ka dhexeeya, sida tusaale ahaan jaranjarooyinka.
- In aad ku tuurto haraaga wixii la qalay qolka qashinka.
- In aad ku tuurto dawooyinka meesha qashinka, iyaga waxaa la gaynayaa farmashiyaha.
- In aad ku rido bacaha balaastigga ah haanta lagu rido qashinka cuntada.

## Kala sooc qashinka cuntada

Haddii ay jirto haan midab keedu yahay bunni ee qashinka cuntada oo aad ku tuurto qashin cuntada, markaas waa in aad adigu kala soocdaa qashinka cuntada. Qashinka cuntada ee la soo ururiyey wuxuu noqonayaa shidaalka biogas-ka ee baabuurtu ku shaqeeyaan.

**Sidan samee:**
Ku rid qashinkaaga bacda bunniga ah ee loogu talagalay ururinta qashinka cuntada. Marka adigu aad diyaar u noqoto in aad tuurto bacda, waxaad adigu ku ridaysaa hanta bunniga ah. Waxay noqon kartaa dhawr maalmood ka dib ama sida ugu dhakhsaha badan ee bacdu ay u buuxsanto oo ay gaarto calaamada xariiqda. Haddii adigu aad buux-dhaafiso bacda waxaa adkaan karta in la xiro.

Si ay bacdu ugu shaqeyso sidii loogu talagalay, wuxuu qofku u isticmaalayaa bacda xajiyihiisa. Haddii adigu aadan ku haysan guriga caaga bacda la dhex-galiyo/xajiyaha, waxaad lasoo xiriirtaa qeybta wargelinta ciladaha.

Waxaa muhiim ah in uusan wax kale ku dhicin/lagu ridin, sida caagadaha, birta iyo dhalada hanta bunniga ah.



### Tani waa qashinka cuntada:

- Haraaga cuntada (qayriin ama la kariyey)
- Rooti
- Khudaarta, waxyaabaha xididdada leh iyo miraha
- Guffarka kaffeega iyo shaandhada kaffeega, guffarka caleenta shaah iyo warqada caleenta shaaha
- Bariis, bur iyo baasto
- Ukun iyo qubka ukunta
- Qolofta ka timaadaa cuntooyinka badda
- Lugaha yaryar ee hilibka, kalluunka iyo shimbiraha
- Ubaxa iyo caleemaha (laakiin aan ahayn ciid/carro)

## Kala sooc iyo dib-u-warshadee

Qol kasta oo ah kan qashinka la dhigo ama dhismayaasha dib-u warshadaynta waxaa yaala tiro haamo buluuga. Iyaga waxaa loogu talagalay in lagu kala sooco kartoomada wixii la gubi karo si dib-loogu warshadeeyo oo ay u noqdaan waxyaabo cusub oo markaa kadibna loo isticmaalo in ka yar khayraadka dhulka inta hadda la isticmaalo.

**Sidan samee:**
Kartoomada waa in aan loo tuurin sidii qashin la gubi karo laakiin waa in la kala sooco si dib loogu warshadeeyo. Haddii adigu aad u soo gadatay alaabta waxa ku jira, sida adigu aad samayso tusaale ahaan caaga ketchup-ka ama weelka malmalaadada/jaamka, markaas taasi waa kartoon/xirmo.

Kartoomada iyo wargeysyada waxaa lagu tuurayaa haamaha buluuga ah iyadoo loo eegayo maaddada/waxa ay ka samaysan yihiin inta badan. Waxaa jira lix nooc oo kala duwan oo loo kala soocayo

- Wixii ku xiran kartoomo
- Wixii ku xiran caaga /balaastiig
- Wixii ku xiran biraho
- Xirmooyinka dhalooyinka midabka leh
- Xirmooyinka dhalooyinka aan midabka lahayn
- Wargeysyada

















Waxyaabaha aan ahayn xirmooyinka, oo aan loo iibsan iyaga waxa ku jira awgood, kama mid ah waxa lagu ridayo haamaha buluugga ah. Taasi waa qashinka la gubi karo ee guriga waxaana lagu tuurayaa haamaha cagaaran ama weel gudo dheer oo loogu talagalay qashinka guban kara ee guriga.

Marka laga reebo haamaha buluugga ah, waxaa sidoo kale jira weelasha batariyada, nalalka iyo qalabka elektaroonigga yar-yar, waa in sidoo kale iyagana loo kala soocaa qashinka guban kara ee guryaha.

### Qashinka waaweyn

Qashinka waaweyni waa waxyaabaha waaweyn sida alaabta guryaha, baaskiilada iyo telefishinada. Qashinka waaweyn lama dhigi karo qolka qashinka caadiga ah, waa in loo qaato mid ka mid ah xarumaha dib-u-warshadaynta ee degmada. Qaar ka mid ah guryahayaga waxaa k yaala qolka qashinka waaweyn.

## Qashinka khatarta ah

Haddii waxa adigu aad rabto in aad tuurto uu u muuqdo, wax iftiimaya ama dhaqdhaqaaqaya, waxaa ku jira elektaroonik. Taasi waxay ka dhigeysaa qashin khatar ah waana in aan lagu dhex tuurin qashin, laakiin waa in la geeyaa xarunta dib-u-warshadaynta. Waxaa jira yaraan qaar ka mid ah biraha oo loo isticmaali lahaa in laga sameeyo qalabka elektarooniga ah, sidaa daraadeed waxaa muhiim in aynu kala soocno si dib loogu warshadeeyo.

**Sidan samee:**
Haddii uu jiro weeelka elektaroonigga yar-yar, batariyada iyo nalalka ee qolkaaga qashinka, waad dhigi kartaa adigu halkaas. Haddii adigu aad leedahay qolka qashinka waaweyn, waxa aad adigu sidoo kale dhigi kartaa qalabka elektarooniga waaweyn sida telifishinada. Haddii adigu aadan lahayn taas, markaas waxaad adigu gaynaysaa qalabkaaga elektarooniga ah, nalalka iyo bateriyada xarun dib-u-warshadeyn. Adigu waxaad sidoo kale geyn kartaa batariyada dukaamada qaarkood.










## Kiimikooyinka

Haddii waxa adigu aad iska tuurayso uu yahay kiimiko, sida tusaale ahaan rinji ama saliida lam oil-ka, markaas taasi waa qashin khatar ah. Xaataa Waxyaabaha ay ka midka yihiin sida lakabka ciddiyaha iyo waxa timaha lagu buufiyo waxaa lagu tirinayaa in ay yihiin qashin khatar ah. Waxyaabaha Kiimikooyinka ah ee lagu tuuro meel khalad ah waxay ka dhigan tahay khatar weyn oo dab ah oo ku timaada baabuurta dab-damiska ama qolka qashinka waaweyn. Sidaa daraadeed waxaad geyneysaa kiimooyinkaaga mid ka mid ah saddexda xarumood ee shaqaaluhu joogaan ee dib-u-warshadaynta ee Sundsvall.



# qasaalada

**Ay tahay in la sameeyo:**

- Dooro saabuunta leh calaamada bay'adda u fiican
- Isticmaal kaliya inta saabuun ah ee loo baahanyahay.
- Kaga tag qasaalada xaalad fiican qofka adiga kaaga danbeeya.
- Ka qaad dufta qashinka filtarka qalajiyaha.

**Ma aha in la sameeyo:**

- Ha ka buuxin qasaalada biyo. Iyada ayaa iska buuxinaysa biyaha.
- Ha u isticmaalin qasaalada wax aan ahayn dhar-dhaqis.
- Ha ku dhaqin rajabeetooyinka qasaalada iyadoo aan wadanin bacda dhaqista.

## Ku dhaq qasaalada dhexdeeda

Dhammaan mashiinada dharka lagu dhaqdo iyaga ayaa iska buuxiya biyaha qaarna waxay xaataa sidoo kale isku qiyaasaan saabuunta dharka lagu dhaqdo. Waxaa muhiim in qof walbaa waqtigiisa isku filaysiiyo oo uusan ku dhaqanin qof kale wakhtigii uu balansaday.



**Sidan samee:**
Mashiinka oo buuxaa, wuxuu isticmaalyaa qiyaastii 70 ml oo saabuun ah. In aad ku shubto saabuun badan kama dhigi doonto mid nadiif badan dharkaaga, balse taasi waxay noqon kartaa in saabuuntii dheeraadka ahayd ay ku harto dharka.

Waa wax caadi ah in qofku isticmaalo carfiso, laakiin run ahaantii waa wax aan loo baahnayn. Ka taxaddar sida aad adigu u isticmaalaysid iyada. Iska ilaali isticmaalka kimikooyinka aadan adigu run ahaantii u baahnayn. Si loo kaydiyo khayraadka, waxaa wanaagsan in la buuxiyo mashiinka, laakiin sidoo kale waxaa muhiim ah in aadan mashiinada buux-dhaafin. Markaas way jebi karaan. Sidoo kale waxaa muhiim ah inaad isticmaasho bacda dhaqista haddii qofku dhaqayo maro ay ku dhegantahay bir, wax soo qalooca, wax sida qataarka oo kale ah, sida rajabeeto.

### Sidan ayaad kaga tagaysaa qasaalada iyadoo fiican:

- Tixgeli waqtiga dhar-dhaqashada adigoo ku dhamaysanaya waqtigaaga.
- Ka qaad dufta qashinka qalajiyaha.
- Nadiifi gudaha qalajiyaha.
- Xaaq oo tirtir dhulka
- Tirtir qasaaladaha iyo saxamada wax lagu dhaqdo.



# warbixin guud

## Ay tahay in la sameeyo

- Kontorool dab-ka digaha marmarka qaarkeed.
- Isla markiiba soo sheega haddii idinku aad ka shakisaan tahay cayayaanka waxyeellada keena.
- Ka taxaddar derbiyada iyo dhulka guriga.
- Ku hay xayawaankaaga guri joogta ah banaanka iyagoo xarig ku xiranyahay.
- Qaad xayawaankaaga guri joogta ah saxaradooda kaddib marka ay xaajadooda gutaan.

## Ma aha in la sameeyo

- Ha dhigin alaabo jaranjarooyinka, waa khatar dabeed.
- Ha isticmaalin koloriin, waxay u xuntahay bey'adda.
- Ha ku cabin sigaark meelaha ku xiran iridaha banaanka ee laga soo galo ama meelaha kale ee dadka ka dhexeeya.
- Guryaha aan sigaarka lagu cabin waxaa ka mamnuuc ah sigaarcabka guriyahaas oo dhan.

## Nadiifinta

Maadaama masaaxada gurigu ay kala duwan tayahay, waa in loo nadiifiyaa siyaabo kala duwan. Qaarkood way ka nugayl badan yihiin kuwa kale, si looga fogaado waxyeellada, waxaa muhiim ah in uu qofku u nadiifiyo si sax ah.



**Sidan samee:**
Dhulka alwaaxa ah wuxuu u nugul yahay biyaha. Sidaa daraadeed, waa in iyaga loo huufareeyaa si joogto ah si looga hortago in aysan wasakhdu ku dhagin. Haddii adigu si kastaba ha ahaatee aad u baahan tahay in aad nadiifiso dhul alwaax ah, waxaad adigu u isticmaali kartaa biyo yar intii suurtogal ah una isticmaal maro. Maradaasi waa in ay noqotaa mid qoyaan yar leh, aysan qoyan mid qoyaan badan leh. Haddii adiga ay qasab tahay in aad isticmaasho waxyaabaha wax lagu nadiifiyo, isticmaal saabuun. Had iyo jeer waxaad iska hubisaa in dhammaan biyaha laga qalajiyo dhulka.

### Waxyaabaha wax lagu nadiifiyo

JInta aynu isticmaalka kiimikooyinka guriga yareynayno, ayey arintu kasii fiicantahay. Haddii adigu aad rabto in aad isticmaasho kiimikooyinka wax lagu nadiifiyo, way fiicantahay haddii adigu aad dooratid alaabta lagu calaamadeeyey Bra Miljöval, Svanen ama EU Ecolabel. Calaamadu waxay ka dhigan tahay in alaabtu ku habboon tahay deegaanka/ bey'adda.

SVANENMÄRKET

EU Ecolabel www.ecolabel.eu

Bra Miljöval

### Koloriin

Koloriintu way xuntahay, maxaa yeelay waxaa ku jira sodium hypochlorite. Waxay dilaysaa bakteeriyada, taas oo u muuqata mid fiican, laakiin taas micnaheedu waxaa weeyaan in ay sidoo kale dilayso bakteeriyada fiican ee biyaheena nadiifisa.




Waxaa jira kuwo badan oo ah waxyaabaha wax lagu nadiifiyo oo u fiican deegaanka/bey'adda, laakiin sidoo kalena wax nadiifinaya. Dooro waxyaabaha wax lagu nadiifiyo sida kuwa ku calaamadaysan in ay u fiican yihiin deegaanka/bey'adda kana taxadar isticmaalkeeda.

## Badbaadada dabka





Dhammaan nabadgeliyadooda, guryaha dhamaantood waxay leeyihiin qalabka dab-kadigaha. Haddii qalabkaaga dab-kadigaha uu qayliyo hal mar kadibna uu aamuso in cabaar ah ka hor qaylada labaad ee xigta, micnaheedu waxaa weeyaan batteriga dabka ayaa sii dhamaanaya. Midkood waxaad adigu shakhsi ahaan bedeli kartaa baterigaaga ama la xiriir qeybta wargelinta ciladaha, markaa waxaa imanaya farsama yaqaanka kadibna badalaya batterigaaga. Qaar ka mid ah guryaha waxay leeyihiin qalabka dab-kadigaha oo batteriyada lagu dhex sameeyey.

Adigu waxaad tijaabin kartaa qalabkaaga dab-kadigaha adigoo guddaha u riixaya bottonka tijaabada. Haddii batteriga iyo sameecadu shaqeynayaan, waxay bilaabi doontaa in ay qayliso.

**Sidan samee:**
Ka fur qalabka dab-kadigaha meeshuu ku dhaganyahay adigoo adeegsanaya in aad u wareejiso dhinaca midigta. Ka saar batteriga ku xiran dhinaca gadaal ee dab-kadigaha kadibna gali meeshaas kan cusub. Marka adigu aad gadaal ugu celinayso dabkadigaha, waxaad hubisaa in geesuhu ay si sax ah ugu fadhiistaan fadhiga. U wareeji dhinaca bidixda ilaa ay mar labaad ka fadhiisato. Tijaabi markaas in uu shaqaynayo.

## Qaabka looga hortago dabka

- Ku hay indhaha wixii shamac nool/daaran
- Ha daarin mishiinada guriga markii adigu aadan joogin guriga.
- Iska hubi in aad damiso dabka cuntada lagu kariyo ka hor intaadan ka tegin guriga.
- Nadiifi marawaxada qiiqa saarta ee jikada.
- Ha dhigin waxyaabo jaranjarooyinka guriga.
- Ha jaaj garayn taleefannada habeenkii.
- Ka bixi jaajarka korontada markii adigu aadan isticmaalayn iyaga.

## Cayayaanka waaxyeelada keena

Baranbarada iyo kutaanka/dhiqlaha waxay u faafaan si fudud, sidaa daraadeed waxaa muhiim ah in dhammaan si wadajir ah looga wada shaqeeyo sidii ay iyagu u lumi lahaayeen/ baabi'i lahaayeen. U la xiriir si deg deg ah qeybta wargelinta ciladaha haddii adigu aad tuhunsan tahay in gurigaaga uu ku dhacay/dhashay cayayaanka waxyeellada keena.





Wax kharash ah kuuguma fadhido kharashka gurigaaga in laga nadiifiyo cayayaanka waxyeellada keena.

Cayayaanka waxyeellada keena waxaa soo jiita cuntada, sidaa daraadeed waxaa qaab fiican oo looga hortagi karo ah iyada oo la hubsado in guriga la nadiifiyo oo wax cunto ah aysan oolin bannaanka.

### U soo sheeg si toos cayayaanka waxyeellada keena!

Haddii adiga gurigaaga uu ku jiro cayayaanka waxyeellada keena, waxaa muhiim ah in aad adigu isla markiiba lasoo xiriirto qeybta wargelinta ciladaha waxaad kala soo xiriiraysaa 060-13 95 00.

Wadajir waarta waa mashruuc Midowga Yurub ah kaas oo MittSverige Vatten & Avfall iyo Mitthem ay ka wada shaqaynayaan mustaqbal waara.

Iyadoo la adeegsanayo iskuulkeena waara ee luuqadaha badan waxaan rabnaa in aan xoojino isdhexgalka oo aan ku dhiirigelinno xulasho bey'addeeda fiican ee nolol maalmeedka.

Hadafku waa in la yareeyo tirada qashinka iyo isticmaalka biyaha iyo korontada cinwaanada la doortay ee Nacksta iyo Skönsberg.

Hadaf kale oo muhiim ah ayaa wuxuu yahay in la horumariyo tusaale loogu talagalay tababar iyo tilmaamid kaas oo loo isticmaali karo isdhexgalka nolosha shaqada.

Mitthem

MittSverige Vatten&Avfall

Arrinta daabacaadda waxaa maalgeliyey mashruuca wadajir waara, oo ay taageerto sanduuqa horumarinta gobollada ee Midowga Yurub.

EUROPEISKA UNIONEN
Europeiska regionala utvecklingsfonden